WISCONSIN DEPARTMENT OF HEALTH SERVICES
Division of Medicaid Services
F-16028SO (01/2018)

NOD

OGAYSIISKA BIXINTA XAD DHAAFKA AH EE FOODSHARE
NOTICE OF FOODSHARE OVERISSUANCE

Magaca Dacwada	Cinwaanka Dacwada		
Taariikhda Ogaysiiska	Lambarka Dacwada	☐ Ogaysiiska Koowaad ☐ Ogaysiiska Saddexaad	☐ Ogaysiiska Labbaad ☐ _____ Ogaysiiska

Gobolka Wisconsin waa adeeg bixiyaha fursada loo siman yahay. Warqaddan waxay ka koobantahay macluumaadka saameeya dheefahaaga. Haddii aad u baahantahay qoraalkan oo ku qoran qaab ka duwan sababtoo ah naafanimo ama haddii aad u baahan tahay warqadan in la turjumo ama laguugu sharaxo luqaddaada, fadlan wac . Adeegyadan waa bilaash.

Waxaa lagu siiyay dheefo FoodShare ah oo ka badan intii aad u qalmaysay inaad hesho. Qadarka si xa dhaad ah laguu siiyay waa $_____ muddada wakhtigan _____. Sharci ahaan, waa inaad dib u bixisaa bixinta xad dhaafka ah ee hoosta lagu saxay. Heshiiska Lacag bixinta lifaaqan waxa uu kuu sheegayaa sida aad dib ugu bixin karto bixinta xad dhaafka ah. Haddii ay tani tahay ogaysiiskaagii koowaad, Xaashida Bixinta xad dhaafka ah way lifaaqantahay oo ku tustaa sida bixinta xad dhaafka ah loo xisaabiyo. Haddii aad sidoo kale dheefaha wax yar lagu siiyay, qadarka aad ibu bixinayso waa la yarayn doonaa qadarka bixinta la yareeyay (eeg laynka 22 ee xaashida shaqada). Dhammaan xubnaha dadka waa wayn ee kooxda ee helay bixinta xad dhaafka ah waxay ka masuulyihiin wixii lacag bixin dheerada ah.

Sababa bixinta xad dhaadka ah

☐ **Khalad aan Ula kac ahayn oo qoyska/macmiilka ah:** _____
Saxeex oo ku soo celi heshiika lacag dib u bixinta lifaaqan _____. Haddii uu dacwadaagu furan yahay oo aanad ka noqon heshiiska, waxaanu yarayn doonaa dheefaha bil kasta 10% ee qoondaynta bilaha ah ama $10, ku kastoo ka wayn, ka bilaabmaysa dheefta bisha xigta. Waxaanu boostadda ku diri doonaa Ogaysiiskaaga Go'aanka (Notice of Decision) 10 maalmood ka hor yaraynta dheefaha. (Dhegaysiga maamulka ama maxkamadda waxa uu go'aan ka gaadhi doonaa khaladkan inuu yahay xadgudubka barnaamijka ula kaca ah. Waxaa lagugu wargelin doonaa haddii dhegaysiga maamuleed ama maxkamadda la qorshayn doono.)

☐ **Khaladka Maamulka/Wakaalada** _____
Saxeex oo ku soo celi heshiika lacag dib u bixinta lifaaqan _____. Haddii uu dacwadaagu furan yahay oo aanad ka noqon heshiiska, waxaanu yarayn doonaa dheefaha bil kasta 10% ee qoondaynta bilaha ah ama $10, ku kastoo ka wayn, ka bilaabmaysa dheefta bisha xigta. Waxaanu boostadda ku diri doonaa Ogaysiiskaaga Go'aanka 10 maalmood ka hor yaraynta dheefaha.

☐ **Xadgudubka Barnaamijka ee Ula kaca ah:** _____
Saxeex oo ku soo celi heshiika lacag dib u bixinta lifaaqan _____. Haddii uu dacwadaagu furan yahay oo aanad ka noqon heshiiska, waxaanu yarayn doonaa dheefaha bil kasta 20% ee xaq u yeelashada bilaha ah ama $20, ku kastoo ka badan, ka bilaabmaysa dheefta bisha xigta. Waxaanu boostadda ku diri doonaa Ogaysiiskaaga Go'aanka 10 maalmood ka hor yaraynta dheefaha.

☐ **Dacwada la xidhay.**
Xataa in kastoo aanad in dheeraad ah helaynin dheefaha, waa inaad dib u bixisaa caymiska dheeraadka ah ee kor lagu sharaxay. Saxeex oo ku soo celi heshiika lacag dib u bixinta lifaaqan _____.

NOD

Xuquuqaaaga iyo Masuuliyada:
Waxaad lahaan doontaa xaqa aad ku codsato dhegaysi xaq ah haddii aad rumaysantahay go'aanka wakaalada aad ka heshay FoodShare bixinta xad dhaafka ah inuu khalad yahay ama haddii aad diidantahay qadarka bixinta xad dhaafka ah. Haddii dacwadaagu uu furanyahay, waxaad heli doontaa Go'aanka Ogaysiiska sharaxaya xuquuqahaaga dhegaysiga iyo sida rafcaanka looga qaato. Ogaysiiskan waxa uu sharaxayaa in aad codsan karto dhegaysi, hadal ahaan ama qoraal ahaan, gudah 30 maalmood oo tallaabada saamaynsa dheefahaaga FoodShare ah. Haddii aad codsato dhegaysi gudaha 10 maalmood ka dib lacag dib u bixinta FoodShare marka ay bilaabmayso, dheefahaaga lama yarayn doono ilaa go'aanka dhegaysiga la gaadho. Haddii dacwadaagu uu xidhan yahay oo aad hesho dheefaha FoodShare mar labbaad, waxaad heli doontaa Ogaysiiska Go'aanka oo waxaad codsan kartaa dhegaysi sida lagu sharaxay Go'aanka Ogaysiiska.

Waxaad leedahay xaqa aad ku codsato dhegaysi xaq ah haddii qadarka bixinta xad dhaafka ah aan lagu habbayn xaga dhegaysiga xaqa ah. Codsiga dhegaysiga xaqa waa in la sameeyaa 90 maalmood taariikhda dhaqan galka ah ee tallaabada wakaalda ama wakhti kasta marka aad helayso dheefo haddii aanad aqbalin qadarka dheefta.

Haddii bixinta xad dhaafka ah aan la bixin, waxaa loo diri doonaa wakaalada soo ururiska kale, kuwaas oo adeegsan doonaa qaabab kala duwan oo ururinta ah si ay u soo qaadaan bixinta xad dhaafka ah. Haddii daynkan noqdo dembiile, qofka(dadka) ka masuulka ah, waxaa laga qaadi doonaa kharash habbayneed oo dheeraad ah.

Waxaanu leenahay xaqa aanu dib ugu eegno oo ku naqilno wax diiwaano la xidhiidha bixintan xad dhaafka ah.

Qoyskaaga waxay samayn karaan heshiis qoran si ay dib ugu bixiyaan bixinta xad dhaafka ah ka hor intaan loo gudbin tallabada soo ururiska federaalka. Haddii bixinta xad dhaafka ah aan la bixin, waxaa loo gudbin doonaa dowladda federaalka tallada soo ururiska federaalka.

Wakaalada gobolka waxay yarayn kartaa qayb kasta oo sheegashada ah haddii wakaalada ay rumaysantahay qoyskaaga inaanu awoodin inay dib u bixiyaan sheegashada.

Waxaa laguu heli karaa adeegyada sharciga oo bilaasha ah. Macluumaadka dheeraadka ah ee adeegyada aagaaga, booqo websaydka Legal Action of Wisconsin (Tallaabada Sharci ee Wisconsin) bogga www.legalaction.org/ ama wac 1-888-278-0633 ama booqo Wisconsin Judicare, Inc., websaydka www.judicare.org/ ama wac 1-800-472-1638.

USDA Warbixinta Takoor La'aanta
Sida uu dhigayo sharciga madaniga ee U.S. Department of Agriculture (USDA) (Wasaaradda Beeraha ee Mareykanka) ee nidaamka madaniga ah iyo xeerarkiisa hay'adda USDA, hay'adaha hoos yimaada, xafiisyadiisa, iyo shaqaalahooda, iyo hay'adaha ka qeyb qaadanaya barnaamijyada ay maamusho USDA waxaa ka reeban in ay sameeyaan heyb sooc ku dhisan qowmiyadda, halka uu qofku ka soo jeedo asal ahaan, jinsiga, diinta uu aaminsan yahay, naafanimo, da'da, cidda uu siyaasadda raacsan yahay in loogu geysto aargoosasho mid kasta oo ka mid ah barnaamijyada madaniga ah ee maamusho ama maalgeliso USDA.

Dadka naafada ah ee leh baahida gaar ah si ay u helaan macluumaadka barnaamijkan (sida farta waaweyn ee lagu qoro, farta waaweyn ee la daabaco, cajalad loou duubo, Luqadda Fara Ka Hadalka ee Mareykanka, iwm.) waa in ay la xiriiraan hay'adda la shaqeyneysa (heer Gobol ama degaan) halka ay ka codsadeen macaashka. Dadka dhagaha la'a, maqalka ama hadalku ku adag yahay waxa ay la soo xiriiri karaan USDA iyaga oo u soo maraya Adeegga Fariimaha ee Dawladda Dhexe ee (800) 877-8339. Waxaa intaa dheer, in macluumaadka barnaamijyada aad ku heli karto afafka kale ee ka baxsan afka Ingiriisiga.

Si aad u soo gudbiso cabasho ku saabsan barnaamijka, buuxio foomka cabashada ee USDA Program Discrimination Complaint Form, (AD-3027) oo aad ka heleyso barta internetka: https://www.ascr.usda.gov/filing-program-discrimination-complaint-usda-customer, oo aad geyn karto mid kasta oo ka mid ah xafiisyada USDA, ama u soo qor oo ku soo hagaaji warqadaada cinwaanka hoos ku qoran. Si aad u codsato foomka cabashada soo wac (866) 632-9992. U soo dir cabashadaada ama warqadaada USDA ee:

NOD

(1) boostada: U.S. Department of Agriculture
Office of the Assistant Secretary for Civil Rights
1400 Independence Avenue, SW
Washington, D.C. 20250-9410;

(2) faakis: (202) 690-7442; ama

(3) iimeyl: program.intake@usda.gov.

Shaqada ay hay'addani qabato waa mid dadku u siman yahay.

SAXEEXA – Shaqaalaha Haynta Dakhliga

Wakaalada	Lambarka Telefoonka (ay ku jirto aaga lambarka summada)

RETAIN COMPLETED FORM IN CASE RECORD